

(Muxuu yahay fripunkt.se)

fripunkt.se waa bayj kuyaala internetka,halkaasoo laga aqrosankaro waxyaabaha laga sameeyo fritidsgård-ka iyo sida ay u shaqeeyaan dadka waawayn ee ka shaqeeya iyo waxyaabaha muhiimada u leh ee ay aaminsan yihiin.

(Waxyaabaha laga sameeyo.)

Fritidsgård-ku waa meel ay dhalinyaradu ku kulmaan oo ay ku nastaan,ku qaxweeyaan, kuna sheekeeystaan.waxay dhalinyaradu ka qaybqaadan karaan hawlaha laga dhex abaabulo sida musiiga,ciyaaraha isboortiga,cunta samayn,TV spel iyo safaro.

(Dad waaweyn ayaa jooga marwalba)

Mar walba waxaa dhalinyarada la jooga dad waaweyn si ay u hagaan hawlaha laga dhexsamaynayo fritidsgård-ka.Hadii ay dhalinyaradu u baahdaan cid ay lahadlaana waa ay na hadli karaan.

(Caddaalad iyo sinnaan)

Qofku mar alaale iyo markuu doono ayuu soo booqan karaa ama ka tagi karaa fritidsgårka oo wax qasab ah majiraan.fritidsgård-ka hawlaha ka socdaa waxay ku dhisan yihiin dimuqraadi iyo xushmad.

Taa micnaheedu waa inuu qofku uu soo bandhigikaro ra'yigiisa sida hawlaha fritidsgård-ka loo kala wadayo,laakiin qofku waa inuu dhagaystaa oo xushmeeyaa ra,yiga dadka kale ee yimaada fritidsgårdka.Waxaan si wadajir ah u doonaynaa in ay fritidsgård-ku ahaato meel aad u xiisa badan horumarna samaysa.

(Muhimadda waxqabadka)

Fritidsgården-ku waa meel ay ku kulmaan dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 13–20 sano.Shaqaalaha ka shaqeeya fritidsgården-ka waa shaqaale xushmeeya ,maqli og dhalinyarada.waana isugu mid dhaliyaradu shaqaalaha fritidsgården-ka Dhaliyaradu way ka qayb qaadanayaan go'aanada lagu hawlgalaayo marka laga hadlaayo tusaale ahaan ciyaaraha la ciyaaro iayagoo masuuliyad iska saaraya Waxaan ku kulmi si wanaagsan oo ay xushmo ku jirto.mana u dulqaadandoono caayda, cunsurinimada.Hadii aan ogaano inay dhacday arimahan aan soo sheegnay waxaan la xiriiraynaa walidiinta, hadii loo baahdana waxaan ogaysiinaynaa hay, ada u qaabilsan dawlada arimahan.

Waxaan bixindoonaa isbortis iyo hawlo kale oo firfircooni ah una wanaagsan caafimaadka.Cunto iyo fika(nusasaace) wanaagsan ayaan bixindoonaa.Hawlaha aan qabano waa ay ka madax banaan yihiin waxyaabaha la xiriira aalkolada,tubakada iyo maandooriyaha sida xashiishada.

Dhalinyaradu waa ay na aaminsanyihiin oo nagu kalsoon yihiin hadaanu nahay shaqaalahga ka shaqeeya fritidsgården-ka.Suaal kastana diyaarbaanu u nahay hadii ay yartahay ama weyn tahay

